IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad Muqdisho, 17ka Agoosto 1988, L. 1 R 8

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMAHU: waa 5 shilin lambar walba — RUKUNKA: Sanadki waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedda waa Shs. 300. Rukunka i weydiisto suxuu ka bilaabanaa 1 Janaayo. Qaybaha qoritaanku F.R. hal ku saddar iyo waxii ka yar waa 3 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiisaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 17 ee 17 Luul. 1988, Oggolaanshaha Xisaab-Xirka Miisaaniyadda Dawladda ee Sannadka 1987. Bog; 589

SHARCI L. 18 ee 26 Luul. 1988, Oggolaansho Meelmarin Heshiis kaalmo farsamo ee dhexmaray JDS iyo Hay'adda Caisse Centrale. » 590

QAYBTA LABAAD

### X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 38 ee 14 Luul. 1988, Billad Dahab Hawlkarnimo. » 591

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 39 ee 14 Luul. 1988, Billad Qalin Hawlkarnimo. » 592

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 40 ee 14 Luul. 1988, Billad Maar oo Hawlkarnimo. » 593

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 41 ee 14 Luul. 1988 Billad Maar ah oo Hawlkarnimo. » 595

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 42 ee 14 Luul. 1988, Billad Maar ah oo Hawlkarnimo. » 596

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 43 ee 14 Luul. 1988, Billad Maamuus «Commendatore oo lagu Maamuusay Professor Goosh. » 597

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 44 ee 13 Luul. 1988, Magacaabid Ku - Xigeenno Xeer-Ilaaliye Guud M.B.D. » 598

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 16, ee 14.6.88, Aqoonsi Urur Samafal. » 599

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA G. BANAADIR 4.7.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran C/casiis Sayid Axmed L. 394 » 600

MAXKAMADDA G. BANAADIR 16.7.88, Lumid Buug Kayd L. 25647 ku qoran Shariif Maxamed Axmed L. 395 » 601

MAXKAMADDA G. BANAADIR 23.7.88, Lumid Jeeg War. L. B.0733844 ku qoran Faaduma Sabriye Samantar L. 396 » 602

MAXKAMADDA G. BANAADIR 13.7.88, Lumid Jeeg War. L. 716314 ku qoran Yaasiin Sh. Saciid L. 397 » 603

MAXKAMADDA G. BANAADIR 30.7.88, Lumid Jeeg War. L. 1042567 ku qoran Maxamed Xuseen Cali L. 398 » 604

MAXKAMADDA G. BANAADIR 11.6.88, Lumid Jeeg War. L. 1038735 ku qoran Deeqa Maxamed Xersi L. 399 » 605

MAXKAMADDA G. BANAADIR 2.8.88, Lumid 7 Jeeg War. ku qoran Cabdi Xasan Macalin L. 400 » 606

MAXKAMADDA G. BANAADIR 3.8.88, Lumid Jeeg War. L. 0337248 ku qoran Suudi Mire Saalax L. 401 » 607

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 12.7.88 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Cabdulle Bilaal Muuse L. 402 » 608

MAXKAMADDA G. BANAADIR 3.8.88, Lumid Jeeg War. L. 0703924 ku qoran Aamina Ciise Warsame L. 403 » 609

MAXKAMADDA G. BANAADIR 15.8.88 Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Maxamed Abuukar Cali L. 404 » 610

MAXKAMADDA G. BANAADIR 6.8.88, Lumid Jeeg War. L. 0039593 ku qoran Aadan Cali Macalin L. 405 » 611

MAXKAMADDA G. BANAADIR 6.8.88, Lumid 6 Jeeg War. ku qoran Maxamed Cabdi Maxamed L. 406 » 612

MAXKAMADDA G. BANAADIR 7.8.88, Lumid Jeeg War. L. 0190912 ku qoran Maxamuud Xuseen Xireey L. 407 » 613

MAXKAMADDA G. BANAADIR 8.8.88 Lumid 11 Jeeg War. ku qoran Aadan Cali Xasan L.408 615

## QEYBTA KOOWAAD

## SHARCI

Sharci lambar 17 ee 17 Luulyo 1988: Oggolaanshaha xisaab_xirka Miisaaniyadda Dawladda ee sannadka 1987.

### MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

### WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### Qod. 1aad

Waxaa la oggolaaday Xisaab_xirka Miisaaniyadda 1987 oo ah sida ku tifaftiran lifaaqa Sharcigan.

### Qod. 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 17 Luulyo 1988

MADAXWEYNAHA JDS
( Maxamed Siyaad Barre )

Sharci lambar 18 ee 26ka Luulyo 1988: Oggolaansho meelmarin Heshiis kaalmo farsamo oo dhexmaray JDS iyo Hay'adda Caisse Centrale (Wrashadda Shamiintada Berbera).

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caisse Centrale ee Dalka Faransiiska, kuna saabsan amaah lacageed oo dhan 23.000.000 Farank-faransiis oo loogu talo galay Kaalmo Farsamo ee Warshadda Shamiintada Berbera.

2. Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday magaalada Muqdisho, markii ay taariikhdu ahayd 15 Maajo 1988.

3. Heshiiskan waxa uu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay tilmaamayaan Heshiiska ku qoran Qod. 1aad ee Sharcigan, waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya iyo Qodobbada Heshiiskan.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxa awood loo siiyey in uu meelmariyo Heshiiskan.

Qod. 4aad

Sharcigan waxa uu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 26.7.1988

MADAXWEYNAHA JDS

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 38 ee 14 Luulyo 1988: Billad Dahab Hawlkarnimo oo lagu maamuusay Jaalle Marxuum G/Sare Axmed Aadan Cabdi oo ka tirsan NSSTA

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Warbixinta Taliyaha Nabad Sugidda Soomaaliyeed;

MARKUU TIXGELIYEY: In Marxuum G/Sare Axmed Aadan Cabdi ahaa qof muujiyey aqoon xirfadeed sare, Hawlkarnimo, Waddaninimo, Daacadnimo, Geesinimo iyo sidii burcadku u dileen isagoo haya hawl-qaran;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in dadka ku shaqeeyey Hawlkarnimo Geesinimo iyo isagoo bagar la'aan u gutay waajibaadkii ka saarnaa ilaa uu ku dhintay shirqoolkii burcadku u dhigeen lagu maamuuso xusuus ahaan aqoonsiga uu ka mudanyahay Ummaddiisa, lagana reebo raad wax ku ool ah;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta MJDS.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

QODOBKA KELIYA

Waxaa lagu maamuusay BILLAD DAHAB AH Marxuum G/Sare Axmed Aadan Cabdi oo ka tirsan Ciidanka NSSTA Hargeysa (Xasuus ahaan).

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markuu Madaxweynaha J.D.S. soo saxiixo.

Muqdisho, 14.7.1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 39 ee 14 Luulyo 1988: Billad Qalin Hawlkarnimo oo lagu maamuusay xasuusta Jaalle Marxuum Xid/le Ismaaciil Cumar Askari iyo Xid/le Marxuum Axmed Ilyaas Xaaji oo ka tirsan NSSTA.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Warbixinta Taliyaha Nabad Sugidda Soomaaliyeed;

MARKUU TIXGELIYEY: In Marxuumiinta Xid/le Ismaaciil Cumar Askari iyo Xid/le Axmed Ilyaas Xaaji ahaayeen Jaalliyaal muujiyey Hawlkarnimo, Waddaninimo, Daacadnimo, Geesinimo iyo iyagoo hagar la'aan u gutay waajibaadkii ka saarnaa ilaa ay ku dhinteen shirqoolkii burcadku Magaalada Hargeysa ugu dhigeen Taariikhdu markay ahayd 19.12.1986 lagu maamuuso xusuus ahaan aqoonsiga ay ka mudanyihiin dhimmaaddooda, lagana reebo raad wax ku ool ah;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta MDJS.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

QODOBKA KELIKA

Waxaa lagu maamuusay Billad Qalin Hawlkarnimo ah Marxuumiin Xid/le Ismaaciil Cumar Askari iyo Xid/le Axmed Ilyaas Xaaji oo ka tirsan Ciidanka NSSTA Hargeysa (Xusuus ahaan).

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markuu Madaxweynaha J.D.S. soo saxiixo.

Muqdisho, 14.7.1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 40 ee 14 Luulyo 1988: Billad Maar ah oo Hawlkarnimo lagu Maamuusay Jaalleyaasha: G/Sare Cabdinaasir Xaaji Xaashi, G/Sare Yuusuf Axmed Maxamuud (Qarawi), G/le Cabduraxmaan Cali Biixi, S/le Daahir Guuleed Warsame, S/le Cabdullaahi Xasan Diirshe iyo Ex. S/le Cabdi Ciise Ducaale.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1976 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Wasaaradda Hawlaha Guud; (HCB/23/3-220/86 ee 24.12.86 iyo WHG&G/SIR/6/85/0142;

MARKUU TIXGELIYEY: In Jaalleyaasha G/Sare Cabdinaasir Xaaji Xaashi, G/Sare Yuusuf Axmed Maxamuud (Qarawi), G/le Cabduraxmaan Cali Biixi, S/le Daahir Guuleed Warsame, S/le Cabdullaahi Xasan Diirshe iyo Ex. S/le Cabdi Ciise Ducaale ay Muujiyeen Hawlkarnimo sidii ay uga hawlgaleen Mashruuca dhismaha Waddada ee laga hirgeliyey Muqdisho, Jasiira iyo Marka;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in qofkii ku sifoobay Hawlkarnimo dheeraad ah isagoo u gutay si hagar la'aan ah waajibaadkii ka saarnaa Dalkiisa iyo Sharafta Ummaddiisa la guddoonsiiyo aqoonsiga uu ka mudan yahay Waddankiisa, loogana reebo raad wax ku ool ah;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta MJDS.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

QODOBKA KELIYA

Waxaa lagu maamuusay Billad MAAR HAWLKARNIMO AH, Jaalleyaasha: G/Sare Cabdinaasir Xaaji Xaashi, G/Sare Yuusuf Axmed Maxamuud (Qarawi), G/le Cabdu-

raxmaan Cali Biixi, S/le Daahir Guuleed Warsame, S/le Cabdullaahi Xasan Diirshe iyo Ex. S/le Cabdi Ciise Du-caale.

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markuu Madaxweyna-ha JDS soo saxiixo.

Muqdisho, 14.7.1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 41 ee 14 Luulyo 1988: Billad Maar Hawlkarnimo oo lagu maamuusay, Degmada Cadale, Wakaaladda Daaqa Qaranka, Mashruuca Horumarinta Xeebaha.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Warbixinta Kaaliyaha Xoghayaha Guud ee XHKS iyo Guddoomiyaha Hoggaanka Cilmi Baarista iyo Hanuuninta Golaha Dhexe X.H.K. Soomaaliyeed;

MARKUU TIXGELIYEY: Dadaalka iyo wax-qabadka ay muujiyeen Degmada Cadale, Wakaaladda Daaqa Qaranka iyo Mashruuca Horumarinta Xeebaha sidii ay dagaalka ta'an ugu qaadeen Bacaad celinta iyo Dhireynta iyagoo beddelay Dabeecadda Deegaanka Cadale;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in Hay'addii ama Hay'adihii ku shaqeeyey Kacaannimo, Waddaninimo, Hawlkarnimo niyadsami iyagoo ku gutay si hagar la'aan ah waajibaadkii ka saarnaa Dalkoodi, Ummaddoodi iyo Shaqaalihii ay wakiilka ka ahaayeen la guddoonsiiyo aqoonsiga ay ka mudan yihiin Waddankooda, lagana reebo raad wax ku ool ah;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta MJDS.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

QODOBKA KELIYA

Waxa lagu maamuusay BILLAD MAAR HAWLKARNIMO: Degmada Cadale, Wakaaladda Daaqa Qaranka iyo Mashruuca Horumarint aXeebaha.

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS.

Muqdisho, 14.7.1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 42 ee 14 Luulyo 1988: Billad Maar ah oo Hawlkarnimo lagu maamuusay Jaalle S/Guuto Jaamac Xirsi Cumar.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 65 ee 19ka Okt. 1970 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Qoraalladii iyo warbixintii Taliyaha Ciidanka Booliska Jaalle S/Gaas Aadan Cabdi Ducaale;

MARKUU TIXGELIYEY: Qaybtii muhiimka ahayd ee uu ka qaatay Hirgelinta dhismaha Xarunta Dhexe ee XHKS;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in dadka ku shaqeeyey niyad sami iyo hawl jacayl iyo daacadnimo, kana qayb qaatay gudashada hawlaha qaranka, looga reebo raad wax ku ool ah;

MARKUU DHEGEYSTAY: Talada Guddiga Abaalmarinta M.J.D.S.;

WUXUU SOO SAARAY:

Xeerka soo socda:

QODOBKA KELIYA

Waxaa lagu maamuusay BILLAD MAAR AH EE HAWLKARNIMO Jaalle S/Guuto Jaamac Xirsi Cumar oo ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markuu Madaxweynaha J.D.S. soo saxiixo.

Muqdisho, 14.7.1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 43 ee 14 Luuljyo 1988: Billad Maamuus «Commendatore» oo lagu maamuusay Professor GOOSH ANDREZJEWISKI & Mudane James Hohnsan.

MADAXWEYNAHA JDS.

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo tan Safiirka JDS u fadhiya London;

MARKUU TIXGELIYEY: Professor Goosh Andrezjewiski tan iyo 1952 xiriir joogta ah la soo lahaa Dalkeena, muddadaa ka shaqeeyey kor u qaadidda, faafinta iyo taabo gelinta Suugaanta, qoridda iyo horumarinta luqadda Soomaaliyeed ilaa uu gaarsiiyey in Jaamacadda London «School of Oriantal Studies» Afka Soomaaligu ka mid noqday afafka looga qaadan karo Shahaado sare ee loo yaqaan M.A. iyo Mudane James Johnson tan iyo 1954 wuxuu ka mid ahaa mudanayaasha Golaha Baarlamaanka Ingiriiska uga dooda Soomaaliya daneeyana arrimaheeda;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in dadka ku shaqeeyey niyad sami iskaashi iyo horumarin labada Ummadood, la guddoonsiiyo Aqoonsiga uu ka mudanyahay Ummadda Soomaaliyeed iyo Dawladdaba, loogana reebo raad wax ku ool ah;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta M.J.D.S.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

QODOBKA KELIYA

Waxaa lagu maamuusay BILLAD MAAMUUS «COMMENDATORE» Professor Goosh Andrezjewiski iyo Mudane JAMES JOHNSON labaduba u dhasheen Waddanka Ingiriiska.

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markuu Madaxweynaha JDS soo saxiixo.

Muqdisho, 14.7.1988

MADAXWEYNAHA J.D S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 44 ee 13 Luulyo 1988 Magacaabid Xu_Xigeenno Xeer_Ilaaliye Guud.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharci lam. 3, soona baxay 10kii Jannaayo 1970kii, kuna saabsan dhismaha Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo wixii beddelaad ku dhacay;

MARKUU TIXGELIYEY: Tala soo jeedinta Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka tirsigeedu yahay 468/MD1/88 ee 11.7.1988;

WUXUU GO'AAMIYAY

Xeerka soo socda:_

Qod. 1aad

G/le Cabdi Gacal Caddoow iyo L.X/le Axmed Cali Xuseen oo labaduba ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed waxaa loo magacaabay Ku_Xigeennada Xeer_Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Badbaadada Dalka;

Qod. 2aad

Ku_Xigeennada Xeer_Ilaaliyaha Guud waxay yeelanayaan gunno dhan Sh.So. 800/= (Siddeedboqol) bishii qofkiiba, waxaana laga bixinayaa Miisaaniyadda Agaasinka Guud ee Lacagta MJDS, iyo Gunnada Garsoorka;

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 13.7.1988

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay.
Diiwaanka L. 4 bog. 60
Muqdisho, 17.7.88,
Hantidhawraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 45, taariikh 26.7.1988:

Meelmarin Heshiis kaalmo farsamo oo dhexmaray JDS iyo Hay'adda Caisse Centrale ee Dalka Faransiiska.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67, faqradda 5, iyo Qod. 82, faqradda 4 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 18 ee 26ka Luulyo ber 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 45 ee 26ka Luulyo 1988 oo Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu uu ku oggolaaday Heshiiska kor ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la meelmariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meelmariyey Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caisse Centrale ee Dalka Faransiiska, kuna saabsan amaah lacageed oo loogu talo galay kaalmo farsamo ee Warshadda Shamiintada Berbera.

Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu Dalka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya ku yeelanayaa awood sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 26.7.1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
( Maxamed Siyaad Barre )

Decree no. 45 of 26.7.1988: Instrument of ratification.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The Article 67, para 5 and the Article 82, para 4 of the Constitution;

HAVING SEEN: The Law no. 49 of 23 December 1984;

HAVING SEEN: The Law no. 18 of 26.7.1988, on the base of which the People's Assembly has aproved the Agreement specified in this Decree;

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement;

HEREBY PROMULGATES

The following Decree:

Article 1

The Loan Facility Agreement between the Somali Democratic Republic and the Caisse Centrale de Cooperation Economique, signed in Mogadishu on 15.5.1988 and concerning the continuation of the technical assistance for the Berbera Cement Factory, is hereby ratified .

Article 2

This Agreement shall have a force of Law in the Territory of Somali Democratic Republic.

Article 3

This Decree shall come into force upan signature by the President of Somali Democratic Republic and shall published inOfficial Bulletin of the State.

Mogadishu, 26.7.1988

THE PRESIDENT OF SDR
(Mohamed Siad Barre)

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 16 ee 14.7.1988

Aqoonsi Ururka Samafalka HELIS.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharci lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO ARKAY: Qod. 54/2 ee Xeerka Madaniga Soomaaliyeed lr. 37 ee 2.6.73;

ISAGOO ARKAY: Xeerka lagu dhisay Ururkaas Samafalka ah;

ISAGOO TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay abuurista Ururada noocani ah.

WUXUU GUDDOONSHAY

Qod. 1aad

Waxaa si rasmi ahaan loo aqoonsaday Ururka Samafalka HELIS oo ah urur samafal, ujeeddadiisuna tahay taakuleynta Bulshada dan yarta ah dhinacyada daawada iyo Gargaarka arrimaha Caafimaadka.

Qod. 2aad

Ururka Samafalka Helis wuxuu saldhiggiisa noqonayaa magaalada Muqdisho.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Dowladda.

Muqdisho, 14.7.1988

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA
(Dr. Maxamed Cabdulle Bacaadle)

## QAYBTA SAD/XAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

### MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### QAYBTA MADANIGA

### GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdulcasiis Sayid Axmed;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 2 Jeeg War. Lam. 0732717-0732718 oo laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna kala jirto lacag kala ah Sh.So. 50.000 iyo Sh.So. 40.000 isugeyn Sh.So 90.000 kuna qoran magaca J.le Cabdulcasiis Sayid Axmed sida ku cad warqadda lam. 6368 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 0732717-0732718 oo laga sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 90.000 kuna qoran magaca J.le Cabdulcasiis Sayid Axmed.

### WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cabdulcasiis Sayid Axmed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 90.000 oo ku qoran Jeegagga Wareega oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.7.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 394

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Shariif Maxamed Axmed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd lam. 25647 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 7.199.67 kuna qoran magaca J.le Shariif Maxamed Axmed sida ku cad warqadda Lr. 1130 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 25647 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 7.199.67 kuna qoran magaca J.le Shariif Maxamed Axmed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J.le Shariif Maxamed Axmed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 7.199.67 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.7.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 395

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Faadumo Sabriye Samatar;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. lam. B.0733844 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 38.000 kuna qoran magaca J.le Faadumo Sabriye Samatar, sida ku cad warqadda lam. 7213 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento Jeeg War. Lr. B.0733844 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 38.000 kuna qoran magaca Faadumo Sabriye Samatar.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J.le Faadumo Sabriye Samatar lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 38.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aankan lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.7.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 396

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Yaasiin Sh. Saciid;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 716314 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 10.000 kuna qoran magaca J.le Cabdi Maxamed Khayre sida ku cad warqadda lam. 6738 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 716314 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna jirto lacag dhan Sh.So. 10.000 kuna qoran magaca J.le Cabdi Maxamed Khayre.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley in ay siiso J.le Yaasiin Sheekh Saciid lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 10.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 13.7.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 397

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Xuseen Cali;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. lam. 1042567 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Cabdi Cartan Maxamuud sida ku cad warqadda Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xisaabaha Guud lam. 7370 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Boosaaso;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 1042567 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Boosaaso kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Cabdi Cartan Maxamuud.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Boosaaso in ay siiso J.le Maxamed Xuseen Cali cagata cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeegga kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ee JDS, haddii intaa ka hor wax ishortaag ah aan ka imaan.

Muqdisho, 30.7.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 398

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Deeqa Maxamed Xersi;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. lam. 1038735 ee laga sameeyey Laanta Ceerigaabo ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Deeqa Maxamed Xersi sida ku cad warqadda lam. 5504 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis- Guud kuna jirto Sh.So. 100.000;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 1038735 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaali- yeed Laanta Ceerigaabo kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Deeqa Maxamed Xersi.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Ceergiaabo ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Deeqa Maxamed Xersi lacagta cadadeedu tahay Sh.Sc. 100.000 oo ku qoran Jeegga kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 11.6.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 399

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cali Xuseen Caalin;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 7 Jeeg War. ee hoos ku tilmaaman lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.347.000 kuna qoran magaca J.le Cabdi Xasan Macalin sida ku cad warqadda lam. 000155 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L/1aad;

| J.W.No. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 0147728 | 400.000 | Cabdi Xasan Macalin | 1aad |
| 0147729 | 300.000 | » » » | » |
| 0162521 | 247.000 | » » » | » |
| 1156069 | 100.000 | » » » | » |
| 1156485 | 100.000 | » » » | » |
| 1156486 | 100.000 | » » » | » |
| 1156067 | 100.000 | » » » | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.347.000 kuna qoran magaca J.le Cabdi Xasan Macalin.

WAXAA L AAMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad in ay siiso J.le Cali Xuseen Caalin lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 1.347.000 oo ah bedelkii Jeegagga kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 2.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 400

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

## GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Suudi Mire Saalax;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0337248 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qardho kuna jirto lacag dhan Sh. So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Suudi Mire Saalax sida ku cad warqadda lam. 7605 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.19 6

## WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0337248 ee laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qardho kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Suudi Mire Saalax.

## WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L/Qardho in ay siiso J.le Suudi Mire Saalax lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 3.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 401

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdulle Bilaal Muuse;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. ee lam. 0445393-0445394 kuna kala jirto lacag dhan Sh. So. 50,000 iyo Sh.So. 40,000 isugeyn Sh.So. 90,000 kuna qoran magaca J.le Cabdulle Bilaal Muuse sida ku cad warqadda lam. 6633 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.19 6

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. lam. dka Soomaaliyeed Laanta 4aad kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 90,000 kuna qoran magaca J.le Cabdulle Bilaal Muuse.

### WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad in ay siiso J.le Cabdulle Bilaal Muuse lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 90,000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 12.7.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 402

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Aamina Ciise Warsame;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. lam. 0708924 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna jirto lacag dhan Sh. So. 30.000 kuna qoran magaca J.le Aamino Ciise Warsame sida ku cad warqadda lam. 00158 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.19 6

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0708924 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000 kuna qoran magaca J.le Aamino Ciise Warsame.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad in ay siiso J.le Aamino Ciise Warsame lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 30.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 3.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 403

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Abuukar Cali;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 3 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Beled Xaawo kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 185.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Abuukar Cali sida ku cad warqadda lam. 7690 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Beled Xaawo;

| J.W No. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Leanta |
|---|---|---|---|
| 1123783 | 100 000 | Maxamed Abuukar Cali | B/Xaawo |
| 0524784 | 50.000 | » » » | » |
| 0524785 | 35.000 | » » » | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9 9.1966

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War ee kor ku tilmaaman ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Beled Xaawo kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 185.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Abuukar Cali.

### WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Beled Xaawo in ay siiso J.le Maxamed Abuukar Cali lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 185 000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 6.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 404

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Cabdullaahi Sh. Cusmaan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. lam. 0039593 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Bangiga Dhexe kuna jirto lacag dhan Sh.So. 500.000 kuna qoran magaca J.le Aadan Cali Macalin sida ku cad warqadda lam. 4355 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laatna Bangiga Dhexe;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0039593 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ban giga Dhexe kuna jirto lacag dhan Sh.So. 500.000 kuna qoran magaca J.le Aadan Cali Macalin.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Bangiga Dhexe in ay siiso J.le Cabdullaahi Sh. Cusmaan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 500.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 6.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 405

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Suufi C/raxiin Muumin;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay jumeen 6 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.000.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Cabdi Maxamed sida ku cad warqadda lam. 7639 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad;

| J.W.No. | Sh.So. | Magaca ku qoran | | | Laanta |
|---|---|---|---|---|---|
| 0178725 | 500.000 | Maxamed | Cabdi | Maxamed | 4aad |
| 1149149 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1149150 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1149151 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1149152 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1149153 | 100.000 | » | » | » | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Shareiga Lr. 2 ee 9.9.1966

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.000.000 kuna qoran magaca J.el Maxamed Cabdi Maxamed.

### WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad in ay siiso J.le Suufi C/raxiin Muumin lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 1.000.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 6.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 406

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Cambaro Maxamuud Dhowre;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0190912 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca J le Maxamuud Xuseen Xireey sida ku cad warqadda lam. 712 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0190912 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad kuna jirto lacag dhan Sh So. 200.000 kuna qoran magaca J le Maxamuud Xuseen Xireey.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad in ay siiso J.le Cambaro Maxamuud Dhowre lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 200 000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 407

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Aadan Cali Xasan;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 11 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha Ceerigaabo iyo Gaalkacyo kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 801.750 kuna kala qoran magacyo kala duwan sida ku cad warqadda lam. 7731 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xisaabaadka Guud;

| J.W.No. | Sh.So. | Magaca ku qoran | | | Laanta |
|---|---|---|---|---|---|
| 1039603 | 100.000 | Aadan Cali Xasan | | | C/gaabo |
| 1039604 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1039610 | 100.000 | » | » | » | » |
| 0668664 | 50.000 | » | » | » | » |
| 0668645 | 50.000 | » | » | » | » |
| 0668646 | 40.000 | » | » | » | » |
| 0668665 | 25.000 | » | » | » | » |
| 1039609 | 100.000 | Faadumo Maxamed Faarax | | | » |
| 0668659 | 36.750 | » | » | » | » |
| 1039288 | 100.000 | Axmed Faarax Maxamed | | | » |
| 0962189 | 100.000 | Bashiir Axmed Xuseen | | | G/kacyo |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966

## WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha Ceerigaabo iyo Gaalkacyo, kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 801.750 kuna qoran magaca mid walba ku hor qoran.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha Ceerigaabo iyo Gaalkacyo in ay siiyaan J.le Aadan Cali Xasan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 801.750 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran markay ka soo wareegto mud do aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aan ka lagu daabaco **Faafinta Rasmiga** ah ee JDS, haddii inta a horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

**Muqdisho, 8.8.1988**

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 408